



## **Barnaamijka FoodShare Employment and Training (Tababarka FoodShare iyo Helista Shaqada ama FSET)** (FoodShare Employment and Training (FSET) Program)

### **Waa maxay barnaamijka FoodShare Employment and Training (Tababarka FoodShare iyo Helista Shaqada ama FSET)**

Barnaamijka FSET waa wax bilaash u ah qofkii raba, barnaamij ah lacag la'aan oo dadka qaata FoodShare ayaa ku baran kara xirfado ay shaqo ku helaan. Dadka qaangaarka ah qaar ayaa laga rabaa shuruudaha shaqada si ay u qaataan FoodShare. Hal wax oo lagu buuxin karo shuruudaha shaqada waa in laga qeybgalo barnaamijka FSET.

### **Habraaca Bilaabista**

Marka hore, waa in aad isku diiwaangeliso FoodShare. Xafiiskaad la xiriirto (eeg bogga 2) ayaa kuu gudbinaya FSET ku yaalla deegaarkaaga. Ka dib waxaad la kulmeysaa shaqaale ka socda FSET si aad ugala hadasho baahidaada iyo yoolalkaaga shaqada. Shaqaalaha ayaa ku tusaya sida loo isticmaalo habka fiican ee raadinta shaqada.

### **FSET Waxay Kugu Caawinayaan:**

- Raadinta iyo isu-gudbinta shaqada.
- Qiimeynta xirfadaha shaqada.
- Qorsheynta shaqada.
- Tababar shaqo iyo waxbarasho.
- Khibrad shaqo.
- Gaadiid, haynta ilmaha, iyo kharashaadka kale ee shaqada la xiriira.
- In lagu gudbiyo adeegyada kale ee bulshada.
- Buuxinta shuruudaha shaqada.

### **FoodShare Wakhtigeedu Xaddidan Yahay iyo Shuruudaha Shaqada**

Dadka ay da'doodu u dhaxayso 18 jir ilaa 52 jir ee aysan u joogin wax carruur ah oo ka yar 18 jir oo kula nool guriga waa inay buuxiyaan shuruudaha shaqada si ay u qaataan FoodShare.

Shuruudaha shaqada FoodShare waa ay ka duwan yihiin kuwa FoodShare ee aasaasiga ah.

Haddii aad u baahan tahay inaad buuxiso shuruudaha shaqada oo aadan soo buuxin, saddex bilood oo keliya ayaaad FoodShare heli kartaa hal mar saddexdii sano. Muddada xaddidan ee hadda waxa ay bilaabatay 1dii Jannaayo, 2023, oo waxay soconaysaa ilaa 31ka Diseembar, 2025.

Dadka qaangaaray waa laga dhaafi karaa ama lagama rabo shuruudaha shaqada haddii ay jirto mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Haddii uu kula noolyahay ilmo ka yar 18 jir oo ka tirsan qoyska oo qaata FoodShare, xataa haddii uusan ilmuhu xaq u lahayn manaafacaadka FoodShare.
- Haddii aad tahay daryeelaha koowaad ee qof kale oo aan awoodin inuu is daryeelo (haddii qofku ku nool yahay gurigaaga ama uu ku nool yahay meel kale).
- Haddii aad tahay daryeelaha koowaad ee ilma da'diisu ka yar tahay 6 jir (haddii ilmuhu ku nool yahay gurigaaga ama haddii uu ku nool yahay meel kale). Hase yeeshee, haddii adiga ama qof kale labadiinuba ilmaha u tihiin waalidka ilaaliya, midkiin ayaa laga deynayaa shuruudda FoodShare marka uu yahay daryeelaha koowaad.
- Marka aadan maskax ahaan ama jir ahaan awoodin in aad shaqeyso.

- Markaad darbijiif tahay oo aadan guri haysan. Dadkaan hoyga haysan waxaa ku jira dadka ku nool guri meelgaar ah, sida guri gabbaad meelgaar ah, ama marka aad qof kale guri uu leeyahay meelgaar ahaan (ilaa 90 maalmood) ugula nooshahay.
- Markaad tahay haweeneey uur leh.
- Marka aad qaadato ama aad codsatay lacagta shaqa-la'aanta.
- Mara lagaa dabiibayo ama aad ku jirto barnaamij ah baxnaaninta alcohol ama other drug abuse (aalkolada ama isticmaalidda maandooriye kale ama AODA).
- Markaad dhigato ugu yaraan saacado kulleej ah tacliin sare ama meel la aqoonsan yahay.
- Markaad tahay 18 jir oo aad dhigato dugsiga sare ugu yaraan maalin barkeed.
- Markaad ka diiwaangashan tahay Wisconsin Works (W-2) oo aad buuxiso shuruudaha W-2.
- Markaad shaqeyneyso 30 saac ama ka badan toddobaadkii ama aad qaadato mushaar ah \$217.50 ama ka badan toddobaadkii.
- Markaad tahay 18 jir ilaa 24 jir loo geeyey dad haya, waalid lacag agu siiyo, ama maxkamad ku amartay in qaraabo loo geeyo, markaad gaartay 18 jir.
- Markaad tahay hawlgab ciidan. Hawlgabka ciidanka waa qof ka soo shaqeeyey Ciidanka Qalabka Sida ee Mareykanka (sida Xoogga, Mariinada, Badda, Ciidanka Cirka , Dayaxgacmeedka, Ilaalada Xeebaha, Ciidan-goboleedka Keydka, iyo Ciidanka Qalabka Sida ee Keydka) markaad sabab u soo hawlgabtay.

**Ogow:** Waxaa lagaa rabaa in aad keento caddeyn ah in aadan shaqeyn karin.

## **Markaad Shuruudaha Shaqada ku soo Sameyneyso FSET**

In aad barnaamijka FSET ka qeybgasho khasab ma aha si aad u hesho FoodShare, laakiin dadka qaangaarka ah ayaa laga rabaa shuruudaha shaqada si ay u helaan manaafacaadka, oo in ay ka qeybgalaan FSET waa sida ay ku soo buuxin karaan shuruudaha shaqada.

## **Ka warran Xannaanada Carruurta iyo Gaadiidka?**

Haddii aad u baahan tahay xannaanada ilmaha, gaadiid, ama adeegyo kale oo taageero ah si aad uga qeybgasho barnaamijka FSET, waxa laga yaabaa in lagu caawiyo. Si aad faahfaahin u hesho, kala hadal qofka ku qaabilsan ee FoodShare ama FSET.

## **Halkee Baan Faahfaahin ka Helayaa?**

- Booqo [www.dhs.wisconsin.gov/foodshare/index.htm](http://www.dhs.wisconsin.gov/foodshare/index.htm).
- La xiriir xafiiska ku qaabilsan.

Si aad u hesho xafiiska, ka eego [www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm](http://www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm), eeg bogga 2 ee waraaqdan, ama soo garaac taleefanka Xafiiska Macaamiisha oo ah 800-362-3002 (TTY iyo turjubaan ayaa lagu hayaa).



**Hay'adaha gobalka ama deegaanka ee Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP) iyo Barnaamijka Cunta Qeybinta ee Indian Reservation (FDPIR), iyo hay'adaha la hawlgala, waa inay soo dhajiyaan Bayaanka Takoor La'aanta ee soo socda:**

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salaysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), caqiidada diimeed, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidhi si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobalka ama deegaanka) ee ay dheefaha ka codsadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag yahay ama hadalka naafada ka ah ayaa la xidhiidhi kara USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (833) 620-1071, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqaha madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in lagu diraa;

- (1) **boostada:**  
Food and Nutrition Service, USDA  
1320 Braddock Place, Room 334  
Alexandria, VA 22314; ama
- (2) **fakiska:**  
(833)-256-1665 ama (202)-690-7442; ama
- (3) **iimaylka:**  
[FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov](mailto:FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov)

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.